

## **Ma ogtahay arrimaha ku saabsan ogaanshaha lacag la'aan ee kansarka naasaha?**

Kansarka naasaha waa kansarka ugu caansan ee lagu sheego haweenka.

Haddii aad tahay haweenay da'deedu tahay 40 sanno ama ka weyn, waxaad xaq u leedahay in aad hesho ogaansho naaska oo lacag la'aan ah mammogram (Raajadda naaska) oo leh OgaanshoNaaska SA labbadii sannaba mar.

Ogaanshaha mammogram (raajadda naaska) hadda waa midka keliya ee xaqiijin sheybaar ahaaneyd oo sheegi kara kansarka naasaha goor hore, inta aysan calaamooyinka bilaabin inay soo if-baxaan.

Xaddiga dadka qaba Kansarka Naasaha way sii kordheysaa sannad kasta, maxaa yeelay ogaansha hore ee kansarka naasaha aad ayuu muhiim u yahay, sahlan tahay iyo daaweeyn guullo badan laga gaaray.

Caafimaadka wanaagsan waa inuu ahaado mudnaantaada koowaad.

Ballan dhigid mar ah ee xarumaheena caafimaad waxay qaadaneysaa oo keliya 10 daqiiqo iyo shaqaalaheen dhedig iyo taqasusayaasha radiographers-ka waxay xaqiijin doonaan waxaad la kulmeysa inay ahaato mid sahlan sida ugu haboon.

Inaad ballan dhigato ama aad ogaato macluumaad dheeri ah, naga soo wac 13 20 50.

Haddii la codsadana turjumaan lacag la'aan ahna wuu jiraa.



## Xaqaa'iqda iyo Macluumaad Muhiim ah

- > Kansarka naaska waa kansarka ugu caansan ee haweenka lagu sheego. 10kiiba 1 haweenay ah ee ku nool Koonfurta Awstareeliya ayaa lagu sheegay kansarka naasaha ka hor da'da ah 75 sanno.
- > Qatarta qabista kansarka naasaha waxay ku saa'idaa da'da. 75% arrimaha kansarka naasaha waxaa lagu sheegaa haweenka ka sareeya da'da 50 sanno jirka.
- > 10kii haween 9 ka mid ah ee lagu sheego kansarka naaska ma u laha farac cudurka.
- > Ogaanshaha mammograms (raajadda naaska) waa qaab cadeynta keliya ee hadda lagu ogaan karo kansarka naaska goor hore, ka hore inta ay haweenayda garan wax calaamo ah.
- > Uma baahnid gudbin inuu dhakhtarkaaga kuu sameeyo ballan xarunta caafimaad ee OgaanshoNaas SA.
- > Xarunta caafimaad ee OgaanshoNaas SA waxay leedahay 7 xaruumood iyo 3 qeybo dhaqhaqaaqa kuwaasoo ku socdaala goobaha baadiyaha labadii sannoba mar.
- > Xittaa haddii aad leedahay raajadda naaska si joogto ah waa kuu muhiin inaad "digtooni naas". Waqti yar sii inaad garato "ekaansha" caadiga iyo "dareenka" naaskaaga tani waxay kaa caawineysaa inaad garato isbedel kasta ee dhaca waqti kasta.
- > Muhiim: Haddii aad dareento wax is bedel ah sida barrar cusub ama qorfax, cabirkoo is bedelay ama qaabka naaskaaga, ibta oo dhacaameysa, xanuun ama maqaarka oo is bedelaay, sameyso ballan si aad kala hadasho calaamooyinka dhakhtarkaaga isla markiiba.
- > Aqbaarta wanaagsan waa xaddiga dadka qaba kansarka naaska ay sii horumaryso sannad kasta. Macluumaad goor dhaw ah waxay tuseysaa haweenka lagu sheegay kansarka naaska inay leeyihii 89% fursad badbaado haddii kansarkeeda la ogaado heerarka hore.
- > Ku dhaqaaq hadda inaad ka sameysato ballan mid ka mid ah xaruumaha. Hawlgalladeena waa lacag la'aan turjumaan lacag la'aan ahna waa la heli karaa haddii la codsado.
- > Taleefoon 13 20 50.